Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب رئيس الوزراء

The Federal Republic of Somalia
Office of the Prime Minister

Tariikh: 27/07/2023

Xeer Ra'iisul Wasaare Lr.136

XEERKA: XEER NIDAAMIYAHA SHARCIGA CUNAQABTEYNTA MAALIYADEED EE CAYIMAN

XRW - BIXIT
30 JUL 2023
OPM - EXIT

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;

Markuu arkay: Qodobka 99aad farqadaha (a), (b) iyo (i) ee Dastuurka KMG.

Markuu arkay: Qodobka 100aad farqadaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG.

Markuu arkay: Warqada summadeedu tahay **WM/XWD-1016/23** ee ku taariikheysan 26 July, 2023 kuna saabsan codsi soojeedinta Ku-simaha Wasiirka ahna Wasiiru Dowlaha Wasaaradda Maaliyadda.

Markuu arkay: Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.40.07.23 ee 27/07/2023,** kuna saabsan ansixinta **Xeer Nidaamiyaha Sharciga Cunaqabateynta Maaliyadeed ee Cayiman** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

Markuu tixgeliyey: Muhiimadda ay leedahay meel-marinta Xeer Nidaamiyaha Cunaqabteynta Maaliyadeed ee Cayiman.

Wuxuu Meel-mariyey:

Qodobka 1aad

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.40.07.23 ee 27/07/2023,** kuna saabsan ansixinta **Xeer Nidaamiyaha Sharciga Cunaqabateynta Maaliyadeed ee Cayiman** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

Qodobka 2aad

Waxaa Wasaaradda Maaliyadda loo igmaday in ay hir-geliso, meel-marisana **Xeer Nidaamiyaha Sharciga Cunaqabateynta Maaliyadeed ee Cayiman**.

Qodobka 3aad

Xeer Nidaamiyaha Sharciga Cunaqabateyta Maaliyadeed ee Cayiman waxa uu dhaqan-galayaa marka uu Saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

Mudane, Hamza Cabdi Barre
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS

SUMMAD: XGG/247/2023 **05/07/2023**

Ku: Wasaaradda Haweenka & Horumarinta Xuquuqul Insaanka **Muqdisho**
Ku: Agaasimaha Golaha Wasiirradda **Muqdisho**
Og: Xafiiska Ra'iisul-wasaaraha Xukuumadda JFS **Muqdisho**

Ujeeddo: Talo Sharci

Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda oo tixraacaya Warqadda **Summad: WC&AD/XAG/459/06/2023,** ee ku taariikhaysan **25/06/2023**, Ujeeddadeeduna ahayd **Soo gudbin Hindise-sharciyeedka Ilaalinta Xuquuqda Naafada Soomaaliyeed,** kana soo baxday Wasaaradda Caddaaladda & Arr. Dastuurka iyo **Warqadda Tixraac: XRW/0270/06/2023,** ee ku taariikhaysan **13/06/2023, lehna isla Ujeeddada Sare ku xusan**, kana Soo baxday Xafiiska Ra'iisul-wasaaraha Xukuumadda JFS.

Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda, asaga oo gudanaya waajibaadkiisa shaqo si waafaqsan Sharci Lr. 18 ee 29 Janaayo 1976, ayaa waxa uu idiin soo gudbinayaa **Hindise-sharciyeedka Sharciga Ilaalinta Xuquuqda Naafada Soomaaliyeed,** oo ay Wasaaradda Caddaaladda & Arr. Dastuurka u soo gudbisay Xafiiska Garyaqaanka Guud, si uu uga guto waajibaadkiisa Shaqo, uguna bixiyo Talo Sharci.

Sidaa darteed, Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda markuu darsay Hindise-sharciyeedkan oo ah mid mudnaan gaar ah u leh Ilaalinta Xuquuqda Sharci ee Naafada Qaranka Soomaaliyeed, waxa uu ku talinayaa Xafiisku in loo gudbiyo Golaha Wasiirrada si ay u ansixiyaan, maadaama uusan ka hor-imaanayn Dastuurka, Shuruucda Dalka iyo Danta-guud, uuna Xafiiska ku daray Ra'yigiisa iyo taladiisa Sharci.

Ugu dambeyn, Xafiiska Garyaqaanka Guud waxa uu ku wargelinayaa Agaasimaha Golaha Wasiirrada iyo Wasaaradda Haweenka in Nuqulka ku lifaaqan warqaddan uu yahay nuqulka asalka ah ee loo gudbinayo Golaha Wasiirada.

FG: halkaan waxaa ku lifaaqan Hindise-sharciyeedka kor ku xusan.

Salaan qadarin leh

Avv. Jibriil Cumar Cilmi
Ku-xigeenka Garyaqaanka Guud ee Dowladda

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA * OFFICE OF THE STATE ATTORNEY GENERAL * مكتب المحامي العام لدولة

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Wasaaradda Maaliyadda
Xafiiska Wasiiru Dowlaha

جمهورية الصومال الفيدرالية
وزارة المالية
مكتب وزير الدولة

The Federal Republic of Somalia
Ministry of Finance
Office of the State Minister

WM /XWD-1016 /23

26 July, 2023

Ku: Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha, Xukuumadda Federaalka Soomaaliya
Og: Agaasimaha Golaha Wasiirada ee Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha
Og: Agaasimaha Guud Ee Wasaaradda Maaliyadda
Og: Wasiir Ku Xigeenka Wasaaradda Maaliyadda
Og: Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda

Ujeeddo: Usoo gudbinta Xeer-nidaamiyaha Sharciga Cunaqabataynta Maaliyadeed ee Cayiman si loo ansixiyo

Waxaan halkan si xushmad leh idin kugu soo gudbinayaa Xeer-nidaamiyaha Sharciga Cunaqabataynta Maaliyadeed ee Cayiman kaas oo looga baahan yahay in ay soo saarto Wasaaradda Maaliyadda, kadibna loo gudbiyo Golaha Wasiirada si loo ansixiyo.

Innago maanka ku hayna nidaamka cusub oo ay tahay in la marsiiyo xeer-nidaamiyaasha ka hor inta aan loo gudbin Golaha Wasiirada, ayaan halkan ku xaqiijinaynaa in xeerkani uu soo maray dhammaan nidaamyadas.

Haddaba, anigoo ka faa'iidaysanaya fursadan, ayaan is xushmad leh idin kugu wargelinayaa in Xeer-nidaamiyahani uu muhiim u yahay dhaqan-gelinta Sharciga Cunaqabataynta Maaliyadeed ee Cayiman, 2023, isla markaana uu sidoo kale yahay mid ka mid ah shuruudaha dayn cafinta oo ay tahay in lasoo buuxiyo ka hor dhamaadka bisha Luulyo, 2023.

Wada Shaqeyn wacan,

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
WASAARADDA MAALIYADDA
MINISTRY OF FINANCE
OFFICE OF THE STATE MINISTER
XAFIISKA WASIIR DOWLAHA
JAMHUURIYADDA FEDERAALKA EE SOOMAALIYA

H.E Raho Mohamud Janaqow
Wasiiru Dowlaha Wasaaradda Maaliyadda
Ahna K/s Wasiirka Maaliyadda

Xeer-nidaamiyaha Sharciga Cunaqabataynta Maaliyadeed ee Cayiman

Waxaa soo saaray Wasiirka Maaliyadda

Julaay, 2023

XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA
OFFICE OF THE PRIME MINISTER
FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA

Tusmo

Qodobka 1-aad:.. 1

Qodobka 2-aad:.. 1

Qodobka 3-aad:..1-3

Qodobka 4-aad:..3-4

Qodobka 5-aad:..4-6

Qodobka 6-aad:..6-12

Qodobka 7-aad:..12-14

Qodobka 8-aad:..14-18

Qodobka 9-aad:..18-20

Qodobka 10-aad:..20-22

Qodobka 11-aad:.. 22

Qodobka 12-aad:.. 23

Qodobka 13-aad:.. 23

Qodobka 14:aad.. 23-24

Qodobka 15-aad:..24-25

XEER-NIDAAMIYAHA SHARCIGA CUNAQABATAYNTA MAALIYADEED EE CAYIMAN

Qodobka 1-aad
Magaca iyo Baaxadda Sharciga

1. Xeer-nidaamiyahaan waxaa lagu magacaabayaa Xeer-nidaamiyaha Sharciga Cunaqabataynta Maaliyadeed ee Cayiman.

2. Xeer-nidaamiyahaan waxaa lagu dhaqayaa dadka, hay'adaha iyo shirkadaha ku sugan xuduuda Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya.

Qodobka 2-aad
Ujeedada Xeer-nidaamiyaha

1. Ujeedada Xeer-nidaamiyahaan waa in Dawladdu hirgeliso Sharciga Cunaqabataynta Maaliyadeed Ee Cayiman ee soo baxay sanadkii 2023 iyadoo la qeexayo ereybixinada muhiimka ah lana cadaynayo doorarka iyo mas'uuliyadda hay'addaha Dawladda iyo kuwa gaarka loo leeyahay. Wuxuu sidoo kale dejinaaya habraacyada ay tahay in si joogtada ah loogu hoggansamo.

2. Isagoo kabaaya Sharciga Cunaqabataynta Maaliyadeed Ee Cayiman, Xeer-nidaamiyahaan waxa uu Soomaaliya u horseedayaa inay yeelato nidaamyo sharci oo dhamaystiran oo u oggolaanaya inay hirgeliso waajibkeeda kaga aadan fulinta cunaqabatayn maaliyadeed ee cayiman ee ka dhanka ah argagixisada iyada oo la raacayo Qaraarada Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay ee lasoo saaray iyadoo loo hoggaansamaayo Cutubka toddobaad (VII) ee Axdiga Qaramada Midoobay.

3. Isagoo kabaaya Sharciga Cunaqabataynta Maaliyadeed ee Cayiman, Xeer-nidaamiyahaan waxa uu sidoo kale aasaasaya nidaamyo sharci oo dhamaystiran oo loogu talagalay in loo isticmaalka hirgelinta cunaqabataynta maaliyadeed ee maxaliga ah, si looga hortago maalgelinta kooxaha argagixisada, iyo dagaalyahanadooda, hawlgalladooda, iyo shabakadahooda khatarta ku ah amniga iyo xasilloonida Soomaaliya.

Qodobka 3-aad
Qeexitaannada/Erey bixin

1. Xeer-nidaamiyahaan dhexdiisa,, ereyadan soo socda wuxuu mid walba yeelanayaa fasiraadda ku hor qoran:

b) **"Kharashaadka daruuriga ah":** waxa loola jeeda cuntada, kirada iyo rahanta, daawada iyo kharashka daawaynta, canshuurta, khidmadaha caymiska, lacagaha loogu talagalay bixinta adeegyada sida biyaha, korontada iyo gaaska ama lacagaha macquulka ah ee la siiyo xirfadlayaasha bixiyo adeegyada la

xiriira matalaada iyo talo-bixinta sharci ama lacagaha kale ee hab waafaqsan sharciga Soomaaliya loogu bixiyo gacan ku haynta lacagaha, iyo hantida kale ee la xayiray.

t) "**Hay'adda Dabagalka iyo Kormeerka ee Awooda uleh**": waxa loola jeedaa, iyada oo la tixgelinayo doorka hay'ad walba, Bankiga Dhexe ee Soomaaliya, Xarunta Warbixinada Maaliyadda, Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka (NISA), Ciidanka Booliska Soomaaliya ama hay'adkasta oo kale oo u xilsaaran dabagalka iyo hubinta in hay'addaha warbixinnada (reporting entities) ay u hoggaansamaan waajibaadkooda ku xussan "Sharciga Ka-hortagga Lacag Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada ee 2016".

t) "**Qofka ama Urur laga saaray liiska**": waxaa loola jeedaa qof ama urur laga saaray liiska cunaqabataynta taasoo keenaysa in qofkaas ama shirkadas laga qaado cunaqabataynta maaliyadeed ee cayiman.

j) "**Qofka ama Urur La-asteeyay**": waxaa loola jeedaa qof ama urur kasta oo uu u asteeyo cunaqabatayn maaliyadeed ee cayiman mid ka mid ah guddiyadan soo socda: Guddiga Qaramada Midoobay ee arimaha Cunaqabataynta Daacish iyo Al-Qaacida ("1267/1989 Committee"), Guddiga Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay ee lagu asaasay Qaraarka lamabrkiisu yahay 1988 ("Guddiga 1988"), ama Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda (NAMLC).

x) "**Dhaqaale**": waxaa loola jeedaa noockasta oo hanti ah oo loo isticmaali karo si loo helo lacag ama hanti kale, alaabo ama adeegyo.

Kh) "**Urur**": waxaa loola jeedaa urur kasta, hay'ad aan diwaangashanayn, shuraako, sanduuq, ama koox kasta oo kale oo aan laheyn shakhsiyad khaanuuneed.

d) "**Kharash aan daruuri ahayn**" waxaa loola jeedaa kharashkasta oo aan buuxinayn qeexitaanka "kharashaadka daruuriga ah".

r) "**Dagaalyahan Argagixiso Ajaanib ah**": Waxa lola jeeda shakhsi bani aadam ah oo u safra dal aan ahayn midka uu daganyahay ama udhashay si'uu u galo, u qorsheyo, ama u diyaariyo, ama ka-qaybqaato falal argagixiso ama si'uu u bixiyo tababar argagixiso ama u qaato.

s) "**Xayiraad**": waxaa loola jeeda mamnuucida ka dhanka ah dirista, sarifka, iska iibinta ama meel kale u qaadida wax kasta oo lacag ah ama hanti kale oo ay leeyihiin ama ay gacanta ku hayaan dad ama hay'ado asteeyn uu ku sameeyay Golaha Ammaanka, ama la-asteeyay iyadoo la raacayo qaraarada Golaha Ammaanka ee la xiriira arrimahan ama ay asteeyeen hay'add ama maxkamadda awood uleh, inta lagu guda jiro muddada ay dhaqan-galka tahay asteeyntaas.

sh) "**Lacag ama Hanti kale**": waxaa loola jeeda hanti kasta, oo ay ku jiraan, laakiin aan ku xaddidnayn, hanti maaliyadeed, ilo dhaqaale (oo ay ku jiraan shidaalka iyo kheyraadka kale ee dabiiciga ah), hanti nooc kasta, ha ahaato mid

la taaban karo ama aan la taaban karin, guurto ama ma guurto, si kastaba oo lagu kasbadayba, iyo dukumeentiyo sharci nooc kasta oo ay yihiin, oo ay ku jiraan kuwa elektarooniga ama dhijitaalka ah, oo caddaynaya lahaanshaha ama dan-ka-lahaansho lacagahaas ama hantidas kale oo ay ku jiraan, laakiin aan ku xaddidnayn, deymaha bangiga, jeegagga safarka, jeegagga bangiga, dalabaadka lacag bixinta, saamiyada, dammaanadaha, dukumeenti muujinaya deymaha Dowladda iyo shirkadaha lasiiyay, damaanadaha bangiyada, faa'iidada saamilayda ama dakhliga kale ama macaash ka soo xarooda ama ay soo saaraan lacagahan ama hantidan kale, iyo hanti kasta oo kale oo laga yaabo in loo isticmaalo si loo helo lacag, alaabo ama adeegyo.

dh) **"Shakhsi":** waxaa loola jeedaa qofka aadamaha ah iyo ama shirkadaha iyo ururada leh shakhsiyad khaanuuned.

c) **"Hay'addaha Warbixinnada":** waxaa loola jeda shakhsiyaadka dabiiciga ah iyo kuwa khaanuuned ee lagu qeexay Qodobka 4-aad ee Sharciga Ka-Hortaga Lacag-Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada ama Xeer-nidaamiyaasha ay soo saarto Xarunta Warbixinnada Maaliyadda si waafaqsan faqradda 3-aad ee Qodobka 4-aad ee Sharcigaan.

g) **"Cunaqabatayn Maaliyadeed ee Cayiman":** waxaa loola jeda xayirista iyo mamnuucista hantida si looga hortago in lacagaha ama hantiyooyina kale loo siiyo, si toos ah ama si dadban shakhsiyaad iyo shirkaddo la asteeyay.

f) **"Si' Daahid La'aan ah" (Without Delay):** waxaa loola jeda sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogalka ah ama 24 saac gudahood xaalad kasta oo lagu jiro.

2. Erey kasta oo aan lagu qeexin Sharciga Cunaqabateynta Maaliyadeed ee Cayiman ama Sharciga Ka Hortaga Lacag-Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada laakiin lagu qeexay Xeer-nidaamiyahaan wuxuu yeelanaya macnaha lagu siiyay Xeer-nidaamiyahaan.

3. Erey kasta oo aan lagu qeexin Xeer-nidaamiyahaan laakiin lagu qeexay Sharciga Cunaqabateynta Maaliyadeed ee Cayiman ama Sharciga Ka Hortaga Lacag-Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada wuxu yeelanaya macnaha lagu siiyay shuruucdaas.

Qodobka 4-aad
Dambiga Maalgelin Argagixiso

1. Dambiga maalgelin argagixiso ee lagu qeexay Qodobka 4-aad ee Sharciga Cunaqabateynta Maaliyadeed ee Cayiman waxa la galay oo kaliya haddii siinta ama ururinta lacagaha ama hantida kale loo sameeyo si ula kac ah.

2. Dembiga ku qeexan farqada 1-aad xarafkiisa (d) ee Qodobka 4-aad ee Sharciga Cunaqabateynta Maaliyadeed ee Cayiman waa in loo fasira si waafaqsan qeexitaanka "Dagaalyahan Argagixiso Ajaanib ah" ee lagu sheegay farqada 1-aad xarafkiisa (r) ee Qodobka 3-aad ee Xeer-nidaamiyahaan.

3. Dambiga maalgelin argagixiso ee lagu sheegay Qodobka 4-aad ee Sharciga

Cunaqabateynta Maaliyadeed ee Cayiman waxaa la-galay haddii lacagaha ama hantida kale ee la siiyay ama la ururiyey ay yihiin kuwa ka yimid ilo sharci ah ama kuwo sharci darro ah.

4. Niyadda iyo ogganshaha loo baahan yahay si loo caddeeyo dembiga maalgelin argagixisada ee lagu qeexay Qodobka 4-aad ee Sharciga Cunaqabateynta Maaliyadeed ee Cayiman waxaa laga fahmi kara xaqiiqada dhabta ah ee ku hareeraysan dhacdada.

5. Dambiga maalgelin argagixiso ee lagu sheegay Qodobka 4-aad Sharciga Cunaqabateynta Maaliyadeed ee Cayiman waxaa loo tixgalinayaa inuu yahay qayb ka mid ah (predicate offense) dembiga lacag dhaqidda si waafaqsan Qodobta 2-aad ee Sharciga Ka Hortaga Lacag-Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada.

Qodobka 5-aad
Xog siinta Hay'addaha Awoodda uleh

1. Si loo aqoonsado shakhsiyaadka iyo hay'adaha (laga yaabo), sababo macquul ah awgeed inay buuxiyeen shuruudaha asteeynta ee Qaramada Midoobay ama kuwa Dalka, ama si ay u gutaan masuuliyadaha kale ee loogu xilsaaray Sharciga Cunaqabateynta Maaliyadeed ee Cayiman gudahiisa ama Xeer-nidaamiyahaan, Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda wuxuu:

b) Ka-dalban kara xog iyo/ama dukumeentiyo qof kasta ama cid kasta, oo ay ku jiraan dawlad kasta oo shisheeye ama urur ay ku midoobeen wadamo.

t) Ka heli kara xog iyo/ama dukumeentiyo, muddo cayiman gudaheed, hay'ad kasta oo xubin ka ah Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda, kuwa ka midka ah Hay'addaha Kormeerka ama hay'add kale.

j) Ku amari kara hay'adaha sharci fulinta ee ku habboon inay soo ururiyaan xog iyo/ama dukumeentiyo iyagoo isticmaalaya dhammaan dariiqooyinka sharciga ah, una hoggaansamaya Xeerka Habka Ciqaabta Soomaaliyeed.

2. Xogta iyo/ama dukumeentiyada uu ku helay Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda si waafaqsan faqradda (1) ee Qodobkan waxa loo isticmaali karaa oo keliya ujeedooyinka loo soo ururiyey.

3. Dhammaan hay'addaha warbixinnadu waa inay si degdeg ah ugu wargeliyaan Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda iyo Hay'adda Kormeerka ee Awoodda uleh, dhammaan xogta la xiriirta mucaamalaad kasta ama lacag ama hanti kale taas oo ay si macquul ah uga shakisanyihiin in loo isticmaalaayo si loogu taageero argagixiso. Si loo hoggaansamo faqradaan:

b) Hay'adda warbixineed waxay u tixgelinaysaa inay heeysato sababo macquul ah oo ay uga shakin karto in mucaamalaad ama lacag ama hanti kale loo isticmaalaayo si loogu taageero argagixiso, haddii:

i. Lacagaha ama hantida kujira gacanta hay'adda warbixineed lagu soo rogay tallaabooyin xayiraad si waafaqsan xarfaha (a) iyo (c) ee faqradda (1) ee Qodobka 7-aad ee Sharciga Cunaqabateynta Maaliyadeed ee Cayiman ama faqradaha (1) iyo (3) ee Qodobka 7-aad ee Xeer-nidaamiyahan.

ii. Mucamalaadka ama isku daygiisu loo mamnuucay si waafaqsan xarafka (b) ee faqradda 1-aad ee Qodobka 7-aad ee Sharciga Cunaqabateynta Maaliyadeed ee Cayiman ama faqradda (4) ee Qodobka 7-aad ee Xeer-nidaamiyahaan.

iii. Mucamalaadka ama isku daygiisu maahan kuwo wajahaya mamnuucida lagu sheegay farqad-hoosadka (ii) ee faqradaan, balse waxa ku lug leh shakhsi ama shirkad la asteeyay ama lacago ama hanti kale oo lagu soo rogay tallaabooyin xayiraad si waafaqsan xarfaha (a) iyo (c) ee faqradda 1-aad ee Qodobka 7-aad ee Sharciga Cunaqabateynta Maaliyadeed ee Cayiman ama faqradaha 1-aad iyo 3-aad ee Qodobka 7-aad ee Xeer-nidaamiyahan.

iv. Mucamalaadka ama isku daygiisu waxaa looga shakisanyahay in lagu taageerayo argagixisanimo, sababo la xiriira aqoonsiga, xiriirka ay leeyihiin, hawlaha ay ku lug leeyihiin, ama goobaha ay dhinacyada mucamalaadka kujira ay ku suganyihiin, ama xaalado kale oo gaar ah.

v. Mucamalaadka ama isku daygiisu waxaa looga shakisanyahay in lagu taageerayo argagixisanimo, sababo la xiriira aqoonsiga, xiriirka ay leeyihiin, hawlaha ay ku lug leeyihiin, ama goobaha ay dhinacyada mucamalaadka kujira ay ku suganyihiin, ama xaalado kale oo gaar ah.

t) Hay'adda warbixineed waa inay u tixgelisaa arrimaha soo socda inay yihiin xog haboon in la ogeysiiyo Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda iyo Hay'adda Kormeerka ee Awoodda uleh:

i. Nooca iyo tirada ama qiimaha lacagta ama hantida kale ee la xayiray si waafaqsan xarfaha (a) iyo (c) ee faqradda 1-aad ee Qodobka 7-aad ee Sharciga Cunaqabateynta Maaliyadeed ee Cayiman ama faqradaha 1-aad iyo 3-aad ee Qodobka 7-aad ee Xeer-nidaamiyahan ama si kale looga shakiyay in loo isticmaalayo in lagu taageero argagixiso.

ii. Taariikhda, cadadka, iyo sifooyinka mucamalaadka ama isku daygiisa iyo aqoonsiga dhinacyada ku lug lahaa mucamalaadka ama isku daygiisa.

iii. Xaaladaha gaarka ah ee ku gedaaman mucamalaadka ama isku daygiisa iyo tallaabooyinka ku haboon oo ay qaaday hay'adda warbixineed si ay ugu hoggaansanto mamnuucidda lagu sheegay xarafka (b) ee farqada 1-aad ee Qodobka 7-aad ee Sharciga Cunaqabateynta Maaliyadeed ee Cayiman ama faqrada 4-aad ee Qodobka 7-aad ee Xeer-nidaamiyahan.

iv. Xaaladaha gaarka ah ee ku gedaaman mucamalaadka ama isku daygiisa iyo tallaabooyinka ku haboon oo ay qaaday hay'adda warbixineed si ay ugu hoggaansanto mamnuucidda lagu sheegay xarafka (b) ee farqada 1-aad ee Qodobka 7-aad ee Sharciga Cunaqabateynta Maaliyadeed ee Cayiman ama faqrada 4-aad ee Qodobka 7-aad ee Xeer-nidaamiyahan.

j) Warbixin waxaa loo arkaa in loo sameeyay si degdeg ah, haddii la sameeyo 48 saacadood gudahood:

i. Marka laga warhelo lacago ama hanti kale ee lagu soo rogay tillaabooyin xayiraad ah si waafaqsan xarfaha (a) iyo (c) ee faqradda 1-aad ee Qodobka 7-aad ee Sharciga Cunaqabateynta Maaliyadeed ee Cayiman ama faqradaha 1-aad iyo 3-aad ee Qodobka 7-aad ee Xeer-nidaamiyahan ama xayiraada lacagahaas ama hantidaas kale.

ii. Marka la qaado wax tallaabo ah oo loogu hoggansamaayo mamnuucidda lagu sheegay xarafka (b) ee faqradda 1-aad ee Qodobka 7-aad ee Sharciga Cunaqabateynta Maaliyadeed ee Cayiman ama faqradda 4-aad ee Qodobka 7-aad ee Xeer-nidaamiyahan.

iii. Marka uu dhaco mucamalaad ama isku daygiisa ee la xiriira arrimahan.

Qodobka 6aad
Asteeymaha ay soo jeedisay Qaramada Midoobay, Asteeymaha Maxalliga ah iyo Codsiyada Dhinacyada Saddexaad

1. Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda ayaa ah hay'adda awoodda u leh, mas'uulkana ka ah inay usoo jeediso Guddiga 1267/1989 iyo Guddiga 1988 shakhsiyaadka ama shirkadaha si loo asteeyo. Marka uu gudanaayo waajibaadkiisa ku cad faqraddan iyo faqradda 1-aad ee Qodobka 6-aad ee Sharciga Cunaqabateynta Maaliyadeed ee Cayiman, Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda waa inuu:

b) Helaa soo jeedinta asteeynta ee loo diraayo Qaramada Midoobay oo ay soo gudbisay mid ka mid ah hay'adaha qaybta ka ah Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda ama hay'adaha kale ee maxalliga ee awoodda uleh. Asteeynta lasoo jeediyay waa inay ku saleeys-naata shuruudaha asteeynta ee ku xusan xaraf hoosaadyada (i) ilaa (x) ee xarafka (j) ee faqraddan.

t) Uruuriya wixii macluumaad dheeraad ah ama dukumeentiyo ah oo ku saabsan shakhsiyaadka ama hay'adaha lagu xusay u-soo jeedinta asteeynta ee loo diray Qaramada Midoobay si waafaqsan faqradda 1(b) ee Qodobkaan.

j) Si degdeg ah uga gaaraa go'aan lagu qaatay cod aqlabiyad ah oo ah saddex meelood laba meel (2/3), muddo 30 maalmood ah gudaheed markuu helo soo jeedinta asteeynta ee loo diraayo Qaramada Midoobay si waafaqsan faqradda 1(b) ee Qodobkaan, jiritaanka sababo maangal ah oo lagu tuhmi karo ama lagu rumaysan karo in shakhsiga ama shirkadda lagu xusay soo jeedintaas ay buuxisay mid ama in ka badan oo ka mid ah shuruudaha asteeynta ee Qaramada Midoobay ee soo socda:

i. Ka qaybqaadashada maalgelinta, qorsheynta, fududaynta, diyaarinta, ama fulinta falal ama hawlo argagixiso, isagoo kaashanaya, isticmaalaya magacooda, matalaya ama taageeraya Al-Qaacida, Daacish, ama unug ama koox xiriir la leh, ka go'aday ama asal ahaan ka soo jeeda iyaga.

ii. Siinta, ka iibinta, ama ku wareejinta Al-Qaacida, Daacish, ama unug ama koox xiriir la leh, ka go'aday ama asal ahaan ka soo jeeda, hub iyo agabka la xiriira.

iii. U shaqaaleysiinta Al-Qaacida, Daacish, ama unug ama koox xiriir la leh, ka go'aday ama asal ahaan ka soo jeeda, shakhsiyaad.

iv. Si kale u taageertaa falalka ama hawlaha Al-Qaacida, Daacish, ama unug ama koox xiriir la leh, ka go'aday ama asal ahaan ka soo jeeda iyaga.

v. Waa shakhsi, koox, ama shirkad ay leedahay ama ay maamusho, si toos ah ama si dadban, ama si kale u taageera, ama loo asteeyay, ama cid kasta, kooxo kasta, ama shirkad kasta oo kale oo lala xiriirinaayo Al-Qaacida ama Daacish.

vi. Ka qaybqaadashada maalgelinta, qorsheynta, fududaynta, diyaarinta, ama fulinta falal ama hawlo argagixiso, isagoo kaashanaya, isticmaalaya magacooda, matalaya ama taageeraya Taalibaan inta loo arkayo inay khatar kuyihiin nabadda, xasiloonida, iyo amniga Afgaanistaan.

vii. Siinta, ka iibinta, ama ku wareejinta Taalibaan inta loo arkayo inay khatar kuyihiin nabadda, xasiloonida, iyo amniga Afgaanistaan, hub iyo agabka la xiriira.

viii. U shaqaaleysiinta Taliban inta loo arkayo inay khatar kuyihiin nabadda, xasiloonida, iyo amniga Afgaanistaan, hub iyo agabka la xiriira shakhsiyaad.

ix. Si kale u taageertaa falalka ama hawlaha kuwa loo asteeyay iyo cid kasta, kooxo kasta, ama shirkad kasta oo kale oo lala xiriirinaayo Taliban inta loo arkayo inay khatar kuyihiin nabadda, xasiloonida, iyo amniga Afgaanistaan.

x. Waa shakhsi, koox, ama shirkad ay leedahay ama ay maamusho, si toos ah ama si dadban, ama si kale u taageera, ama loo asteeyay, ama cid kasta, kooxo kasta, ama shirkad kasta oo kale oo lala xiriirinaayo Taliban inta loo arkayo inay khatar kuyihiin nabadda, xasiloonida, iyo amniga Afgaanistaan.

x) Marka uu go'aamiyo in la buuxiyey mid ama in ka badan oo ka mid ah shuruudaha asteeynta ee lagu sheegay faqradda (1) (j) ee Qodobkaan, waa inuu u diyaariyaa soo jeedin asteeyn ee Qaramada Midoobay si loogu gudbiyo Guddiga 1267/1989 ama midka 1988. Marka uu gudanaayo waajibaadkiisa sida ku cad farqadan, Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda waa inuu:

i. Raaca dhammaan habraacyada iyo foomamka caadiga ah ee ku haboon, ee uu ansixiyay Guddiga 1267/1989 ama midka 1988.

ii. Bixiya dhammaan macluumaadka habboon ee la heli karo ee ku saabsan shakhsiga ama cidda loo soo jeediyay in la asteeyo, oo ay ku jiraan macluumaadka aqoonsiga oo dhamaystiran oo si sax ah loogu aqoonsan karo shakhsiyaadka, kooxaha, shirkada, iyo ururada.

iii. Bixiya dhammaan macluumaadka habboon ee Interpol u baahantahay, si'ay usoo saarto Ogeysiis Gaar ah (Special Notice).

iv. Bixiya tafaasiil dhamaystiran ee la xiriirta xogta kiiska oo muujinaysa arrimaha lagu saleeyay asteeynta, oo ay ku jiraan macluumaadka gaarka ah ee taageeraya go'aanka ku aadan in qofka ama hay'addu ay buuxisay

shuruudaha ku habboon ee asteeynta. Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda waa inuu ogeysiiyaa Guddiga 1267/1989 ama midka1988 haddii qaybo ka mid ah xogta kiiska ay tahay qarsoodi oo aan lala wadaagi karin dadweynaha.

v. Si gaar ah u iftiimiya macluumaadka kujira xogta kiiska oo ka mid yihiin xog kasta oo taageeraysa ama dukumeenti kasta oo lala wadaagi karo Guddiga 1267/1989 ama midka1988. Sidoo kale, waa in Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda bixiyaa faahfaahinada mujiinaya xiriirka ka dhexeeya qofka la soo jeediyay in la asteeyo iyo shakhsi kasta ama cid kasta oo hore loo asteeyay.

vi. Iftiimiya, marka soo jeedinta asteeynta loo gudbinaayo Guddiga 1267/1989, in doorka Soomaaliya ee ah dalka samaynaya asteeynta la shaacin karo.

kh) U gudbiya soo jeedinta la diyaariyay iyadoo la raacaayo faqradda (1)(x) ee Qodobkaan, Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga ah si ay degdeg ugu soo gudbiso Guddiga 1267/1989 ama midka 1988.

(d) Oofiya mas'uuliyaddaha lagu qeexay faqradda (1)(b) ilaa (1)(kh) iyada oo aan loo ogeysiinayn, ama lala tashanayn, shakhsiga ama cidda ku xussan soo jeedinta asteeynta ee loo gudbiyay si waafaqsan faqradda (1)(b) ee Qodobkaan.

2. Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda waa hay'adda awoodda u leh inay asteeyso shakshiga ama cid kasta oo maxali ah ee soo buuxisay shuruudaha asteeynta ee ku xusan Qaraarka Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay ee tirsigiisu yahay 1373. Guddigu marka uu gudaneyo waajibaadkiisa ku cad faqraddan iyo faqradda 2-aad ee Sharciga Cunaqabateynta Maaliyadeed ee Cayiman waa inuu:

(b) Helaa soo jeedinta asteeynta maxalliga ah oo ay soo gudbisay mid ka mid ah hay'adaha qaybta ka ah Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda, hay'adaha kale ee maxalliga ee awoodda uleh, dawlad kasta oo shisheeye, ama urur kasta caalami ah oo dalal ku midoobeen. Asteeynta lasoo jeediyay waa inay ku saleeys-naata shuruudaha asteeynta ee ku xusan xaraf hoosaadyada (i) ilaa (iv) ee xarafka (j) ee faqraddan. Asteeymaha maxaliga oo ay soo jeediyaan dawladaha shisheeye ama urur ay ku midoobeen wadamo, waxaa loo soo diri karaa:

i. Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda, iyada oo loo maraayo nidaamyada diblomaasiyadeed oo ay adeegsato Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga; ama

ii. Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda, iyada oo loo maraayo nidaamyada xog is dhaafsiga rasmiga ah oo ay adeegsato Xarunta Warbixinada Maaliyadda.

(t) Uruuriya wixii macluumaad dheeraad ah ama dukumeentiyo ah oo ku saabsan shakhsiga ama cidda lagu xusay u-soo jeedinta asteeynta ee maxalliga ah ee waafaqsan faqradda 2(b) ee Qodobkaan.

(j) Si degdeg ah uga gaaraa go'aan lagu qaatay cod aqlabiyad ah oo ah saddex meelood laba meel (2/3), muddo 30 maalmood ah gudaheed markuu helo soo jeedinta asteeynta maxalliga ah ee waafaqsan faqradda 2(b) ee Qodobkaan, jiritaanka sababo maangal ah oo lagu tuhmi karo ama lagu rumaysan karo in shakhsiga ama cidda lagu xusay soo jeedintaas ay buuxisay mid ama in ka badan oo ka mid ah shuruudaha asteeynta ee maxalliga ah ee soo socda:

i. Galitaanka ama isku dayga galitaanka falal argagixisanimo.

ii. Ka qaybqaadashada ama fududeeynta fulintanka falal argagixisanimo.

iii. Waxaa si toos ah ama si dadbanba uleh ama gacanta ugu haya, mid ama in ka badan oo ka mid ah shakhsiyaadka ama shirkaddaha soo buuxiyay shuruudaha asteeynta ee lagu qeexay farqada 2(j) (i)-(ii).

iv. Wuxuu wakiil kayahay ama ka amar qaata, mid ama in ka badan oo ka mid ah shakhsiyaadka ama shirkaddaha soo buuxiyay shuruudaha asteeynta ee lagu qeexay farqada 2(j) (i)-(ii).

(x) Marka uu go'aamiyo in la buuxiyey mid ama in ka badan oo ka mid ah shuruudaha asteeynta ee lagu sheegay faqradda (2) (j) ee Qodobkaan, Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda waa inuu asteeya shakhsiga ama cidda arintu ku saabsan tahay, iyadoo lagu daabacayo asteeynta bogga internet-ka ee Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda. Marka uu gudanaayo waajibaadkiisa ku cad farqadan, Guddigu waa inuu:

i. Ku daabaca bogga internet-ka ee Guddiga dhammaan macluumaadka habboon ee la heli karo, oo ay ku jiraan macluumaadka aqoonsiga oo dhamaystiran oo si sax ah loogu aqoonsan karo shakhsiga ama cidda la maxalli ahaanta loo asteeyay.

ii. Ku daabaca bogga internet-ka ee Guddiga macluumaad dhamaystiran ee la xiriirta xogta kiiska oo muujinaysa arrimaha lagu saleeyay asteeynta, oo ay ku jiraan macluumaadka gaarka ah ee taageeraya go'aanka ku aadan in qofka ama hay'addu ay buuxisay shuruudaha ku habboon ee asteeynta.

iii. Ku daabaca bogga internet-ka ee Guddiga macluumaadka muujinaya saamaynta asteeyntu leedahay oo ay ku jiraan xayiraada lacagaha ama hantida nuucyadeed kale iyo kusoo rogida amarrada mamnuucidda lacagahaas ama hantidaas si waafaqsan qaybaha faqraddaha 1-aad ee Qodobka 7-aad ee Sharciga Cunaqabateynta Maaliyadeed ee Cayiman iyo faqradaha 1-aad, 3-aad iyo 4-aad ee Qodobka 7-aad ee Xeer-nidaamiyahaan.

iv. Ururiya liis lagu daabacayo bogga internet-ka ee Guddiga, dhammaan asteeymaha maxalliga ah ("Liiska Maxalliga ah ee Shakhsiyaadka La-asteeyay").

v. Ku daabaca bogga internet-ka ee Guddiga habraaca wax ka beddelka ama ka noqoshada asteeynta maxalliga ah ee lasameeyay, sida ku cad Qodobada 8 iyo 9 ee Sharciga Cunaqabateynta Maaliyadeed ee

Cayiman iyo Qodobbada 8 iyo 9 ee Xeer-nidaamiyahaan.

(kh) La wadaago dhamaan hay'addaha warbixinnada asteeymaha maxalliga lasameeyay, kadib marka la gaaro go'aanka ku cad faqradda 2(j) ee Qodobkaan.

(d) Oofiya mas'uuliyaddaha lagu qeexay faqradda (1)(t) ilaa (kh) iyada oo aan loo ogeysiinayn, ama lala tashanayn, shakhsiga ama cidda ku xussan soo jeedinta asteeynta maxalliga ah ee loo gudbiyay si waafaqsan faqradda (2)(b) ee Qodobkaan.

(r) Si degdeg ah uga gaaraa go'aan, lagu qaatay cod aqlabiyad ah oo ah saddex meelood laba meel (2/3), in dawlad shisheeye ama urur ay ku midoobeen wadamo loo gudbinaayo codsi ku aadan in iyagoo raacaya shuruucdooda, ay asteeyaan shakhsiyaad ama cid kale ee loo asteeyay si maxalli ah oo waafaqsan faqradda 2(j) iyo (x) ee Qodobkaan. Go'aanka Guddiga waxa uu ku salaysnaan karaa jinsiyadda, goobta deeganka u ah ama uu ku ganacsado, ama hawlaha shakhsiga ama cida sida maxalliga ah loo asteeyay ay qabato ama arrin kasta oo kale oo xubnaha Guddigu u arkaan inay tahay maangal.

(s) Marka uu go'aansado in loo gudbiyo codsi asteeyn dawlad shisheeye ama urur ay ku midoobeen wadamo iyada oo la raacayo farqada 2(r) ee faqraddan, Guddigu waa inuu:

i. Diyaariya codsi ka kooban macluumaadka lagu aqoonsan karo shakhsiga ama cidda iyo xog kale ee dheeriga ee lagu saleeyay asteeynta. Waa in lagu xusaa, ugu yaraan, macluumaadka lagu qeexay farqadaha 2(x) (i)-(ii) ee Qodobkaan.

ii. Xaqiijiyaa inuusan Guddiga kahor furnayn codsi wax ka beddelid ama ka noqosho asteeyn oo loo soo gudbiyay si waafaqsan faqraddaha Qodobka 8-aad ee Sharciga Cunaqabateynta Maaliyadeed ee Cayiman iyo Qodobka 8-aad ee Xeer-nidaamiyahaan. Sidoo kale, waa in la xaqiijiyaa inaysan jirin dacwad ka furan Maxkamadda Sare ee waafaqsan Qodobka 9-aad ee Sharciga Cunaqabateynta Maaliyadeed ee Cayiman iyo Qodobka 9-aad ee Xeer-nidaamiyahaan oo ka dhan ah go'aan diidmo ah oo laga qaatay codsi nuuca kor lagu xusay oo kale ah.

iii. Marka uu dhammaystiro tallaabooyinka lagu tilmaamay farqada 2 (s) (ii), u gudbiya codsiga loo diyaariyay si waafaqsan farqada 2 (s)(i) Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga ah si'ay si degdeg ugu sii gudbiso dawlad shisheeye ama urur ay ku midoobeen wadamada.

3. Labaatan iyo afar (24) saac gudahooda oo ka bilaabanaysa marka Qaramada Midoobay ay soo saarto war saxaafadeedkeeda si guud u shaacinaaya go'aan ka soo baxay Guddiga 1267/1989 ama midka 1988 ee lagu asteeyay shakhsi ama hay'ad, ama wax looga beddelay asteeyn horay ujirtay ama liiska asteeynta looga saaray shakhsi ama cid kale, waa in Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada uu:

b) Ku daabaca asteeynta, wax ka beddelka liiska shakshiyaadka la asteeyay iyo cinwaanka bogga internetka ee muujinaya liiska shakhsiyaadka la

cunaqabateeyay ee Gudiyadda Qaramada Midoobe bogga internetka ee Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada.

t) Ku daabaca bogga internetka ee Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada, saameynta ay leedahay asteeynta, oo ay ka mid tahay xayiraada lacagaha iyo hantida nuuc-yadeeda kale iyo mamnuucida ka dhanka ah hantidaas iyo lacagtaas, kuwaa oo lagu qeexay faqradda 1-aad ee Qodobka 7-aad ee Sharciga Cunaqabateynta Maaliyadeed ee Cayiman iyo faqradda (1)(b) iyo faqradaha 3-aad ilaa 4-aad ee Qodobka 7 ee Xeer-nidaamiyahan. Waa in sidoo kale la dabaaca saameynta ay yeelanayso ka saarista shakhsiyaadka liiska shakhsiyaadka la asteeyay, oo ay ka mid tahay ka qaadista xayiraad iyo mamnuucis lacagaha iyo hantida nuuc-yadeeda kale sida ku qeexan faqradda 5(b) ee Qodobka 7-aa ee Xeer-nidaamiyahaan.

j) La wadaaga asteeynta iyo wax-kabedelka liiska shakhsiyaadka la-asteeyay Hay'addaha Warbixinnada.

x) Ku daabaca bogga internet-ka ee Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada, macluumaadka ku saabsan jiritaanka Xafiiska Qaramada Midoobay ee Gardoonka iyo u Qaabilsanaha Qaramada Midoobay ee arrimaha Ka-saarista Liiska Asteeynta shakhsiyaadka ay asteeyeen Guddiyada 1267/1989 ama 1988. Macluumaadka nuucaan ah ee la daabacaayo waa inay ka koobnata cinwaanka bogga internetka ee Qaramada Midoobay kaas oo muujinaya habka iyo meesha lagu diraayo codsiyada ka saarista liiska shakhsiyaadka la asteeyay.

4. Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada waa inuu qaada dadaal kasta oo macquul ah oo lagu wargelinaayo muwadiniinta Soomaaliyeed iyo shakhsiyaadka aan Soomalida aheyn ee degan ama ka haw-gala Soomaaliya, asteeynta lagu sameeyay. Wargelinta lagu xusay halkaan:

b) Waxaa lagu diri karaa cinwaanka boostada ama iimayl-kii ugu danbeeyay ee laga haayo shakhsiga la asteeyay, haddii macluumaadkaas la haayo.

t) Waa inay ka koobnata:

i. Magaca Hay'adda sameeysay asteeynta.

ii. Saameynta asteeyntu leedahay, oo ka mid tahay xayiraada iyo mamnuucista lagu soo rogay lacagaha iyo hantida nuuc-yadooda kale ee ku qeexan faqradda 1-aad ee Qodobka 7-aad ee Sharciga Cunaqabateynta Maaliyadeed ee Cayiman iyo faqraddaha 1-aad, 2-aad iyo 3-aad ee Qodobka 7-aad ee Xeer-nidaamiyahaan.

iii. Macluumaadka la xiriira habka looga dalban karo Qaramada Midoobay ama Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada in shakhsiga la asteeyay laga saaro Liiska Shakhsiyaadka La-asteeyay, sida lagu qeexay faqradda (3)(x) ee Qodobkan ama faqradaha 7-aad iyo 8-aad ee Qodobka 8-aad ee Xeer-nidaamiyahaan iyo faqradda 2(x)(v) ee Qodobkaan.

5. Daabacaddaha loo baahanyahay in la sameeyo si waafaqsan faqradda 3-aad ee Qodobkaan ama faqradda (2)(x) ee Qodobkaan, waxaa loo tixgelinaya inay yihiin ogeysiisyo dhamaystiran oo buuxinaya shuruudaha ku qeexan faqradda 4-aad ee Qodobka 6-aad ee Sharciga Cunaqabateynta Maaliyadeed ee Cayiman iyo faqrada 4-aad ee Qodobkaan, marka cidda ogeysiiska loo diraayo ay tahay muwadin Soomaliyeed ama qof degan ama ka hawl-gala Soomaliya ee la asteeyay, kaas oo meesha uu ka daganyahay dalka ama cinwaakiisa iimayl-ka ah aan la garaneyn ama xilligaas aan laga heli karin cinwaankiisi ugu danbeeyay ee la yaqaanay ee iimayl-ka ama goobta uu dagana.

Qodobka 7-aad
Xayiraada iyo Mamnuuc Saarista Lacagaha iyo Hantida Nuuc-yadeeda kale

1. Marka laga reebo xaalada sida cad loogu oggolaaday si waafaqsan Qodobka 10-aad ee Sharciga Cunaqabateynta Maaliyadeed ee Cayiman iyo Qodobka 10-aad ee Xeer-nidaamiyahaan, dhamaan shakhsiyaad iyo cid walba waxaa waajib ku ah inay si degdeg ah u xayiraan lacagaha iyo hantida nuuc-yadeeda kale oo ay leeyihiin kuwan soo socda:

b) Shakhsiyaadka ama cid kasta oo kale ee uu asteeyay Guddiga 1267/1989 ama midka 1988 ee Qaramada Midoobay.

t) Shakhsiyaadka ama cid kasta oo kale ee uu asteeyay Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada.

2. Si waafaqsan ujeedooyinka Sharciga Cunaqabateynta Maaliyadeed ee Cayiman iyo Xeer-nidaamiyahaan, shakhsi ama cid kale waxaa loo tixgelinaya in la asteeyay marka ay jiraan xaaladaha soo socda:

b) Marka arrintu khusayso sakhsiyaadka ama cid kasta oo kale ee uu asteeyay Guddiga 1267/1989 ama midka 1988 ee Qaramada Midoobay: marka Qaramada Midoobay ay soo saarto war saxaafadeed si guud u shaacinaya go'aan lagu asteeyay shakhsi ama cid kale ee uu gaaray Guddiga 1267/1989 ama midka 1988.

t) Marka arrintu khusayso sakhsiyaadka ama cid kasta oo kale ee uu asteeyay Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada: marka lagu soo daabaco asteeynta bogga internetka ee Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada.

3. Lacagaha iyo hantida nuuc-yadeeda kale ee shakhsiyaadka iyo cida kale ee la asteeyay, waxa ay ka koobanyihiin kuwa soo socda oo larabo in lagu soo roggo xayiraadda lagu qeexay faqrada 1-aad ee Qodobkaan:

b) Dhammaan lacagaha iyo hantida nuuc-yadeeda kale oo ay leeyihiin ama ay maamulaan shakhsiyaad ama cid kasta ee la asteeyay. Xayiradda kuma saabsana oo keliya lacagaha iyo hantida nuuc-yadeeda kale ee lala xiriirinaayo fal, shirqool, ama khatar argagixisanimo ee gaar ah.

t) Lacagaha ama hantida nuuc-yadeeda kale oo ay si buuxda oo kelinimo ah ama si wadajir ah, si toos ah ama si dadban ay u leeyihiin ama u maamulaan shakhsiyaad ama cid kale oo la asteeyay.

j) Lacagaha ama hantida nuuc-yadeeda kale ee laga kasbaday ama laga helay lacago ama hanti kale oo ay si toos ah ama si dadban ay u leeyihiin ama u maamulaan shakhsiyaad ama cid kale oo la asteeyay.

x) Lacagaha ama hantid nuuc-yadeeda kale ee shakhsiyaadka ama cid kasta oo wakiil ka ah ama ka amar qaadaneysa shakhsiyaad ama cid kale ee la asteeyay.

4. Marka laga reebo xaalada sida cad loogu oggolaaday si waafaqsan Qodobka 10-aad ee Sharciga Cunaqabateynta Maaliyadeed ee Cayiman iyo Qodobka 10-aad ee Xeer-nidaamiyahaan, dhamaan shakhsiyaad iyo cid walba waxaa laga mamnuucay inay u oggolaadan, si toos ah ama si dadban, si kelinimo ah ama si wadajir ah, wax lacag ah ama hanti nuuc-yadeed kale, ilo dhaqaale soo saara ama adeegyo maaliyadeed ama kuwa kale ee la xiriira:

b) Shakhsiyaadka ama cid kasta ee lagu qeexay xarafaha (b) iyo (t) ee faqrada 1-aad ee Qodobkaan.Waxaa kaloo mamnuuca in loo oggolaado shakhsiyaadkaas ama ciddaas inay si uun uga faa'ideystaan lacagaha ama hantida nuuc-yadeed kale, ilaha dhaqaalaha soo saara ama adeegyada maaliyadeed ama adeegyada kale ee la xiriira.

t) Cid kasta ee uu leeyahay ama maamulo, si toos ah ama si dadban shakhsiyaad ama cid kasta ee lagu qeexay xarafaha (b) iyo (t) ee faqrada 1-aad ee Qodobkaan. Waxaa kaloo mamnuuca in loo oggolaado ciddaas inay si uun uga faa'ideysato lacagaha ama hantida nuuc-yadeed kale, ilaha dhaqaalaha soo saara ama adeegyada maaliyadeed ama adeegyada kale ee la xiriira.

j) Shakhsiyaadka ama cid kasta oo wakiil ka ah ama ka amar qaadaneysa shakhsiyaad ama cid kale ee lagu qeexay xarafaha (b) iyo (t) ee faqrada 1-aad ee Qodobkaan. Waxaa kaloo mamnuuca in loo oggolaado shakhsiyaadkaas ama ciddaas inay si uun uga faa'ideystaan lacagaha ama hantida nuuc-yadeed kale, ilaha dhaqaalaha soo saara ama adeegyada maaliyadeed ama adeegyada kale ee la xiriira.

5. Dhamaan shakhsiyaadka iyo cid kasta waa inay muddo 24 saacadood gudaheed xayiraada kaga qaadaan lacagaha ama hantida nuuc-yadeeda kale ee shakhsiyaadka iyo cid kasta ee laga saaray liiska shakhsiyaadka la asteeyay, marka:

b) Qaramada Midoobay ay soo saarto war saxafadeed si guud u shaacinaya go'aanka Gudigga 1267/1989 ama midka 1988 oo ku aadan ka saarista shakhsi ama cid kale liiska shakhsiyaadka la asteeyay.

t) Lagu daabaco bogga internet-ka ee Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada go'aan kasoo baxay Guddiga ee ku aadan in shakhsi ama cid kale laga saaray liiska shakhsiyaadka la asteeyay, sida ku cad

faqrada (4)(t) ee Qodobka 8-aad ama faqrada (11)(t)(ii) ee Qodobka 8-aad ee Xeer-nidaamiyahan.

j) Marka Maxkamadda Sare ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ay soo saarto amar looga saarayo shakhsi ama cid kale liiska shakhsiyaadka la asteeyay, si waafaqsan faqrada (4)(b) ee Qodobka 9-aad ee Xeer-nidaamiyahaan.

Qodobka 8-aad
Cabashooyinka Ka dhanka ah Asteeynta

1. Shakhsi ama cid kasta ee uu asteeyay Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada ama wakiil kasta oo si sharci ah u matalaya, waxa uu Guddiga uso gudbin kartaa cabasho:

b) Ku aadan in asteeynta is-beddel lagu samayo, haddii shakhsiga ama cida la asteeyay ay aaminsantahay in macluumaadka loo daabacay si waafaqsan Qodobka 6-aad faqradiisa (2)(x)(ii) ee Xeer-nidaamiyahaan ay kujiraan khaladaad waaweyn.

t) Ku aadan ka-saarista liiska shakhsiyaadka la asteeyay, lagana qaado xayiraadda iyo mamnuucista ka dhanka ah ee ka dhashay go'aan waafaqsan faqradda 1-aad ee Qodobka 8-aad ee Sharciga Cunaqabateynta Maaliyadeed ee Cayiman iyo faqradaha 1-aad, 3-aad iyo 4-aad ee Qodobka 7-aad ee Xeer-nidaamiyahan, haddii shakhsiga ama cida la asteeyay ay aaminsantahay in aysan jirin ama ay meesha ka baxeen sababihii maangalka ahaa oo lagu tuhmi karay ama lagu rumeysan karay inay soo buuxiyeen mid ka mid ah shuruudaha lagu sheegay faqrada (2)(j)(i)-(iv) ee Qodobka 6-aad ee Xeer-nidaamiyahan.

2. Marka ay soo gaarto cabasho loo soo gudbiyay si waafaqsan faqrada 1-aad ee Qodobkaan, Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada waa inuu:

b) Soo uruuriya dhamaan macluumaadka iyo dukumintiyada la heli karo oo lagama maarmaanka u ah go'aanka looga baahanyahay inay qaatan, si waafaqsan faqrada (2)(t) ee Qodobkaan.

t) Si degdeg ah uga gaaraa go'aan lagu qaatay cod aqlabiyad ah oo ah saddex meelood laba meel (2/3), muddo 30 maalmood ah gudaheed kadib marka ay soo gaarto cabashada, in la aqbalaayo cabashada iyo in kale.

3. Marka uu go'aansado inuu aqbalo cabashada loo soo gudbiyay si waafaqsan faqrada (1)(b) ee Qodobkaan, Guddigu waa inuu:

b) Ogeysiiya shakhsiga ama cida soo gudbisatay cabashada.

t) Ku daabaco bogga internet-ka ee Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada is-bedelka lagu sameeyay macluumaadka aqoonsiga iyo/ama xogta kiiska ee isbedelka lagu sameeyay.

j) Waa inuu cusbooneeysiiya liiska shakhsiyaadka la asteeyay ee maxalliga ah ee ku daabacan bogga internet-ka ee Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada.

x) La wadaaga dhammaan hay'adda warbixinnada is-bedelka lagu sameeyay liiska shakhsiyaadka la asteeyay.

4. Marka uu go'aansado inuu aqbalo cabashada loo soo gudbiyay si waafaqsan faqrada (1)(t) ee Qodobkaan, Guddigu waa inuu:

b) Ogeysiiya shakhsiga ama cida soo gudbisatay cabashada.

t) Ku daabaco macluumaadka ka saarida liiska shakhsiyaadka la asteeyay bogga internet-ka ee Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada.

j) Waa inuu ku daabaca bogga internet-ka ee Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada macluumaadka ku saabsan saameynta ay leedahay tallabada ka-saarista liiska shakhsiyaadka la asteeyay, oo ay kamid tahay ka qaadista xayiraada lacagaha iyo hantida nuuc-yadeeda kale si waafaqsan faqrada (5)(t) ee Qodobka 7-aad ee Xeer-nidaamiyahan.

x) Waa inuu cusbooneeysiiya liiska shakhsiyaadka la asteeyay ee maxalliga ah ee ku daabacan bogga internet-ka ee Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada.

kh) La wadaaga dhammaan hay'adda warbixinnada is-bedelka lagu sameeyay liiska shakhsiyaadka la asteeyay.

5. Mark Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada uu go'aansado inuu diido cabasho loo soo gudbiyay si waafaqsan faqrada (1) (b) ama (t) ee Qodobkaan, waa in Guddigu ogeysiiya shakhsiga ama cida soo gudbisatay cabashada.

6. Shakhsi ama cid kasta oo cabashadooda loo soo gudbiyay si waafaqsan faqrada (1)(t) ee Qodobkaan ee ku saabsaneyd in laga saaro liiska shakhsiyaadka la asteeyay uu Guddigu diiday, waxay soo gudbisan kartaa oo keliya cabashooyin kale ee ku saabsan in laga saaro liiska shakhsiyaadka la asteeyay si waafaqsan faqrada (1)(t) ee Qodobkaan, haddii mid ka mid ah shuruudaha soo socda ay soo buuxiso:

b) Cabashada cusub ee ku saabsan in laga saaro liiska shakhsiyaadka la asteeyay waxay ku salaysan tahay sababo kale oo aan ahayn kuwa cabashadii hore ee liis ka saarista lagu saleeyay; ama

t) Cabashada cusub ee ku saabsan in laga saaro liiska shakhsiyaadka la asteeyay waxay ku salaysan tahay isla sababaha cabashadii hore ku salaysneyd, balse waxay ka koobantahay macluumaad iyo dukumintiyo cusub.

7. Muwadin ama cid kasta oo Soomaaliyeed ama shakhsi ama cid kasta oo aan Soomaali aheyn balse degan ama ka hawl-gasha Soomaaliya, ee uu asteeyay Guddiga 1267/1989 ama midka 1988, waxay usoo gudbisan kartaa Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada cabasho ku saabsan ka saarista liiska shakhsiyaadka la asteeyay, haddii shakhsiga ama cida la asteeyay ay aaminsantahay in aysan jirin ama ay meesha ka baxeen sababihii maangalka ahaa oo lagu tuhmi karay ama lagu rumeysan karay inay soo buuxiyeen mid ka mid ah shuruudaha lagu sheegay faqrada (1)(j)(i)-(x) ee Qodobka 6-aad ee Xeer-nidaamiyahan.

8. Marka Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada ay soo gaarto cabashada loo soo gudbiyay si waafaqsan faqrada 7-aad ee Qodobkaan, Guddigu waa inuu:

b) Soo uruuriya dhamaan macluumaadka iyo dukumintiyada la heli karo oo lagama maarmaanka u ah go'aanka looga baahanyahay inay qaatan, si waafaqsan faqrada (8)(t) ee Qodobkaan.

t) Si degdeg ah uga gaaraa go'aan lagu qaatay cod aqlabiyad ah oo ah saddex meelood laba meel (2/3), muddo 30 maalmood ah gudaheed kadib marka ay soo gaarto cabashada, in la aqbalaayo cabashada iyo in kale.

9. Marka uu go'aansado inuu aqbalo cabashada loo soo gudbiyay si waafaqsan faqrada (7) ee Qodobkaan, Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada waa inuu:

b) Ogeysiiya shakhsiga ama cida soo gudbisatay cabashada.
t) Diyaariya codsi ku socda Qaramada Midoobay ee ku saabsan ka saarista liiska shakhsiyaadka asteeysan si loogu gudbiyo Guddiga 1267/1989 ama midka 1988.

j) Raaca dhammaan habraacyada iyo foomamka loogu talagalay oo ay ansixiyeen Guddiga 1267/1989 ama midka 1988.

x) Gudbiyaa macluumaadka haboon ee lagu saleeynaayo tallabada ka saarista liiska shakhsiyaadka la asteeyay, oo ay kujirto macluumaadka gaar ah oo saldhig u noqon kara go'aan ku aadan in shakhsiga ama cidda kale aysan soo buuxinayn ama aan lagu dabaqi karin shuruudaha asteeynta ee ku haboon.

kh) U gudbiya codsiga la diyaariyay iyadoo loo hoggansamaayo farqada (9)(b) ee Qodobkaan Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga ah, si ay si degdeg ugu sii gudbiso Guddiga 1267/1989 ama midka 1988.

10. Marka Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada uu helo macluumaadka cusub ee la xiriira hawlaha ama xiriirka shakhsi ama cid kale oo ku jirta liiska shakhsiyaadka la asteeyay ee Guddiga 1267/1989, ama midka 1988, ama liiska maxalliga ah, Guddigu waa inuu:

b) Soo uruuriya dhamaan macluumaadka iyo dukumintiyada la heli karo oo lagama maarmaanka u ah go'aanka looga baahanyahay inay qaatan, si waafaqsan faqrada (10)(t) ee Qodobkaan.

t) Si degdeg ah uga gaaraa go'aan lagu qaatay cod aqlabiyad ah oo ah saddex meelood laba meel (2/3), muddo 30 maalmood ah gudaheed kadib marka ay soo gaarto macluumaadka cusub, in wali ay jiraan iyo in kale sababo macquul ah oo lagu tuhunsan yahay ama la aaminsan yahay in shakhsiga ama cidda kale ay soo buuxisay shuruudaha asteeynta ee ku habboon.

11. Marka Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada uu gaaro go'aan waafaqsan faqradda (10)(t) ee Qodobkaan, ee ku saabsan in aysan jirin sababo macquul ah oo lagu tuhmi karo ama loo rumaysto in shakhsiga ama cidda kale ay soo buuxisay shuruudaha asteeynta ee ku haboon, Guddigu waa inuu:

b) Haddii shakhsiyaadka ama cidda kale ay ku jiraan liiska shakhsiyaadka la asteeyay ee Guddiga 1267/1989 ama midka 1988:

i. Diyaariya codsi ku socda Qaramada Midoobay oo ku saabsan ka-saarista liiska shakhsiyaadka asteeynsan, si loogu diro Guddiga 1267/1989 ama midka 1988.

ii. Raaca dhammaan habraacyada iyo iyo foomamka loogu talagalay oo ay ansixiyeen Guddiga 1267/1989 ama midka 1988.

iii. Gudbiyaa macluumaadka haboon ee lagu saleeynaayo tallabada ka saarista liiska shakhsiyaadka la asteeyay, oo ay kujirto macluumaadka gaar ah oo saldhig u noqon kara go'aan ku aadan in shakhsiga ama cidda kale aysan soo buuxinayn ama aan lagu dabaqi karin shuruudaha asteeynta ee ku haboon.

iv. U gudbiya codsiga la diyaariyay iyadoo loo hoggansamaayo farqada (11)(b)(i) ee Qodobkaan, Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga ah, si ay si degdeg ugu sii gudbiso Guddiga 1267/1989 ama midka 1988.

t) Haddii shakhsiyaadka ama cidda kale ay ku jiraan liiska shakhsiyaadka la asteeyay ee maxalliga ah:

i. Qaado tallaabooyin wax ku ool ah oo lagu wargelinaayo shakhsiga ama cidda kale ee asteeysan.

ii. Ku daabaca tallabada ka-saarista liiska shaqsiyaadka la asteeyay bogga internet-ka ee Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada.

iii. Ku daabaco bogga internet-ka ee Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada macluumaadka ku aadan saamaynta ay leedahay tallaabada ka-saarista liiska shakhsiyaadka la asteeyay, oo ka mid tahay ka qaadista xayiraada lacagaha iyo hantida nuuc-yadeed kale, si waafaqsan faqrada (5)(t) ee Qodobka 7-aad ee Xeer-nidaamiyahan.

iv. Cusbooneeysiiya liiska shakhsiyaadka la asteeyay ee maxalliga ah ee ku daabacan bogga internet-ka ee Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada.

v. La wadaaga dhammaan hay'adda warbixinnada tallabada ka-saarista liiska shakhsiyaadka la asteeyay ee maxalliga ah.

12. Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada waa inuu fududeeyaa dib u eegisyada uu sameeyo Guddiga 1988 ee Qaramada Midoobay si waafaqsan habraaca markaas dhaqan-galka ah ee uu ansixiyay Guddiga 1998 ama Wakiilka Arrimaha Liis Ka-saarista ee Qaramada Midoobay.

Qodobka 9-aad
Dacwadaha Maxkamadda Sare ee Ka-dhanka ah Asteeymaha

1. Shakhsi ama cid kasta oo kale ee uu asteeyo Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada oo cabashadiisa ku saabsaneyd in laga saaro liiska shakhsiyaadka la asteeyay ee loo gudbiyay si waafaqsan faqrada (1)(t) ee Qodobka 8-aad ee Xeer-nidaamiyahaan uu diiday Guddiga, waxa uu ka furan kara Maxkamadda Sare ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya dacwad ka dhan ah asteeynta lagu sameeyay, soddon (30) maalmood gudahooda marka uu helo ogeysiinta diidmada ee waafaqsan faqradda 5-aad ee Qodobka 8-aad ee Xeer-nidaamiyahan.

2. Marka ay dhagaysaneyso cabashooyinka loo soo gudbiyay si waafaqsan faqrada 1-aad ee Qodobkaan, Maxkamadda Sare waxay dhagaysan karta oo keliya labada nooc ee cabashooyinka ah ee soo socda:

b) Cabashooyinka ku andacoonaya in asteeynta uu sameeyay Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada si khaldan loo sameeyay, iyadoo shakhsiga ama cidda kale ee la asteeyay aysan soo buuxin shuruudaha lagu xussay faqradda (2)(j)(i)-(iv) ee Qodobka 6-aad ee Xeer-nidaamiyahan xilliga asteeynta lasamaynaayay.

t) Cabashooyinka ku andacoonaya in shakhsiga ama cidda kale ee asteeynta uu ku sameeyay Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada aysan sii buuxin karin xilligan hadda ah shuruudaha lagu sheegay faqradda (2)(j)(i)-(iv) ee Qodobka 6-aad ee Xeer-nidaamiyahan.

3. Maxkamadda Sare waxay awood u leedahay oo kaliya inay dhageysato cabashooyinka shakhsiyaadka ama ciddii kale oo ay asteeysay Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada. Maxkamadda Sare awood uma laha inay dhageysato cabashooyinka shakhsiyaadka ama ciddii kale oo ay asteeysay Guddiga 1267/1989, ama midka 1988 ee Qaramada Midoobay ama Guddi kale ee Qaramada Midoobay ee arrimaha cunaqabateynta.

4. Haddii Maxkamadda Sare ay u xukmiso shakhsi ama cid kale ee uu asteeyay Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada, waa in ay:

b) Haddii xukunku yahay in asteeynta loo sameeyay si khaldan, xukunkaas oo ka dhashay cabashada loo soo gudbiyay si waafaqsan faqrada (2)(b) ee Qodobkaan:

i. Soo saarta amar lagu baabi'inayo asteeynta.

ii. Siisa magdhow u dhigma waxyeello kasta oo soo gaaray soo cabtaha.

t) Haddii la xukumo in shakhsi ama cid kale oo uu asteeyay Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada aysan wali sii buuxin karin shuruudah asteeynta ee lagu xusay faqradda (2)(j)(i)-(iv) ee Qodobkaan, Maxkamaddu waa inay soo saarta amar lagu baabi'inayo asteeynta.

5. Marka Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada uu helo nuqulka amarka Maxkamadda Sare ee baabi'inta asteeynta, waa in Guddigu uu:

b) Ku daabaca tallaabada ka-saarista liiska shakhsiyaadka la asteeyay bogga internet-ka ee Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada.

t) Ku daabaca bogga interner-ka ee Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada, saameeynta ay leedahay tallaabada ka-saarista liiska shakhsiyaadka la asteeyay, oo ay ka mid tahay ka qaadista xayiraada lacagaha iyo hantid nuuc-yadeeda kale, si waafaqsan faqradda (5)(j) ee Qodobka 7-aad ee Xeer-nidaamiyahan.

x) Waa inuu cusbooneeysiiya liiska shakhsiyaadka la asteeyay ee maxalliga ah ee ku daabacan bogga internet-ka ee Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada.

kh) La wadaaga tallabada ka-saarista liiska shakhsiyaadka la-asteeyay Hay'addaha Warbixinnada.

6. Go'aanka Maxkamada Sare waa kama dambays.

Qodobka 10-aad
Xayiraada Ka Dhaafid

1. Shakhsi ama cid kale oo kasta oo ku jirta liiska shakhsiyaadka la asteeyay ee Guddiga 1267/1989 ama midka 1988 ama liiska maxalliga ah oo lacagtiisa iyo hantidiisa kale la xayiray si waafaqsan faqrada 1-aad ee Qodobka 7-aad ee Sharciga Cunaqabateynta Maaliyadeed ee Cayiman ama faqrada 1-aad iyo 3-aad ee Qodobka 7-aad ee Xeer-nidaamiyahan, waxa uu usoo gudbisan kara Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada codsi xayiraada ka dhaafid, oo ku aadan inuu isticmaalo qayb kamida ama dhammaan lacagaha iyo hantidooda kale ee la xayiray, si ay u bixiyaan:

b) Kharashyada daruuriga ah oo ay ayagu u baahnyihiin ama shakhsiyaadka kale ee ku tiirsan.

t) Kharashyada aan daruuriga ah oo ay ayagu u baahnyihiin ama shakhsiyaadka kale ee ku tiirsan.

2. Marka Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada uu helo codsi xayiraada ka dhaafid ee waafaqsan faqrada (1)(b)(t) ee Qodobkaa, Guddigu waa inuu:

b) Soo uruuriya dhamaan macluumaadka iyo dukumintiyada la heli karo oo lagama maarmaanka u ah go'aanka looga baahanyahay inay qaatan, si waafaqsan faqrada (2)(t) ee Qodobkaan.

t) Si degdeg ah uga gaaraa go'aan lagu qaatay cod aqlabiyad ah oo ah saddex meelood laba meel (2/3), muddo 10 maalmood ah gudaheed kadib marka ay soo gaarto codsiga xayiraad ka dhaafidda, in la aqbalaayo codsiga iyo in kale.

3. Marka Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada uu helo codsi xayiraada ka dhaafid ee uu soo diray shakhsi ama cid kale ee ku jirta liiska shakhsiyaadka la asteeyay ee Guddiga 1267/1989 ama midka 1988 ee Qaramada Midoobay, Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada waa inuu:

b) Qeexa haddi ay jiraan shuruudo gaar ah ama xaddidaadyo oo oggolaanshiisu ku xiranyahay.

t) Wargeliya codsaha.

j) Diyaariya ogeeysiis xayiraad ka dhaafid ama codsi, hadba tii haboon, taasoo loo gudbinaayo Guddiga 1267/1989 ama midka 1988, iyadoo la raacinaayo qoraal ku saabsan shuruudaha gaarka ah ama xaddidaadyada lagu qeexay faqrada (3)(b) ee Qodobkaan.

x) Raaca dhammaan habraacyada iyo foomamka loogu talagalay oo ay ansixiyeen Guddiga 1267/1989 ama midka 1988 ee Qaramada Midoobay.

kh) Gudbiyaa dhamaan macluumaadka haboon ee la heli karo ee ku saabsan codsiga xayiraad ka dhaafista, oo ay kujiraan qaddarka lacagta iyo ujeedooyinka lacagtaas loo isticmaalaayo.

d) U gudbiya ogeysiiska ama codsiga la diyaariyay iyadoo loo hoggansamaayo farqada (3)(j) ee Qodobkaan, Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga ah, si ay si degdeg ugu sii gudbiso Guddiga 1267/1989 ama midka 1988 ee Qaramada Midoobay.

4. Marka Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada ay soo gaarto codsi xayiraad ka dhaafis ee uu soo diray shakhsi ama cid kale ee kujirta liiska shakhsiyaadka la asteeyay ee maxalliga ah, Guddigu waa inuu:

b) Qeexa haddi ay jiraan shuruudo gaar ah ama xaddidaadyo oo oggolaanshiisu ku xiranyahay.

t) Wargeliya codsaha.

5. Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada waa inuu u dhaqan-geliya oo keliya codsiyada xayiraad ka dhaafista ee la oggolaaday si waafaqsan faqradda (2)(t) ee Qodobkaan sida soo socota:

b) Codsiyada xayiraad ka dhaafista ee shakhsiyaadka ama cidda kale ee ku jirta liiska shakhsiyaadka la asteeyay ee Guddiga 1267/1989 ama midka 1988 ee loo soo gudbiyay si waafaqsan faqradda (1)(b) ee Qodobkaa, waa in la dhaqan-geliya saddex maalmood gudahood kadib marka Guddiga 1267/1989 ama midka 1988 ogesiiska uu helo ogeysiiska, balse waa in Guddiga 1267/1989 ama midka 1988 uusan ka hor imaan codsiga.

t) Codsiyada xayiraad ka dhaafista ee shakhsiyaadka ama cidda kale ee ku jirta liiska shakhsiyaadka la asteeyay ee Guddiga 1267/1989 ama midka 1988 ee loo soo gudbiyay si waafaqsan faqradda (1)(t) ee Qodobkaan, waa in la dhaqan-geliya marka la helo oggolaanshaha cad ee Guddigii 1267/1989 ama midka 1988.

j) Codsiyada xayiraad ka dhaafista ee shakhsiyaadka ama cidda kale ee ku jirta liiska shakhsiyaadka la asteeyay ee maxalliga ah ee loo soo gudbiyay si waafaqsan faqradda (1)(b)(t) ee Qodobkaan, waa in la dhaqan-geliya marka Guddiga Qaran ee

ka Hortagga Lacag Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada uu soo saaro oggolaansho waafaqsan faqradda (2)(t) ee Qodobkaan.

6. Marka uu dhaqan-gelinaayo codsiyada xayiraad ka dhaafista ee waafaqsan faqradda 5-aad, Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada waa inuu:

b) U diraa shakhsiga ama cidda kale ee gacanta ku haysa lacagaha ama hantida kale ee xayiran, ogeysiis ku aadan xayiraad ka dhaafista.

t) La wadaaga nuqulka ogaysiiska la soo saaray si waafaqsan faqradda (6)(b):

i. Codsadaha.

ii. Hay'addaha Awoodda uleh ee Kormeerka iyo Dabaglka.

Qodobka 11-aad
Kormeerka iyo Dabagal

1. Hay'adda Awoodda uleh ee Kormeerka iyo Dabagalka ayaa masuul ka ah kormeerka iyo xaqiijinta in hay'adda warbixinnadu ay u hoggansama waajibaadkooda ku xussan Sharciga Cunaqabateynta Maaliyadeed ee Cayiman iyo Xeer-nidaamiyahaan.

2. Si loo xaqiijiyo in si buuxda loo dhaqan-geliyo Sharciga Cunaqabateynta Maaliyadeed ee Cayiman iyo Xeer-nidaamiyahaan, dhammaan hay'addaha warbixinnadu waa in ay:

b) Dhisaan, walibana joogteeyaan nidaamyo gudaha ah ee qasabka uu ka dhigay Qodobka 17-aad ee Sharciga Ka-Hortaga Lacag-Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada ee lagu hubinaayo Ka-hortaga Lacag-Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada.

t) La wadaagan Hay'addaha Awoodda uleh ee Kormeerka iyo Dabagalka iyo Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada wakhtiga la cayimay gudahiisa, wixii macluumaad ama dukumeentiyo ah oo gacantooda ku jira.

3. Iyadoo loo hoggaansamaayo Sharciga Cunaqabateynta Maaliyadeed ee Cayiman iyo Xeer-nidaamiyahaan, Hay'addaha Awoodda uleh ee Kormeerka iyo Dabagalka iyo Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada, waa inay u ilaaliyaan macluumaadka iyo dukumeentiyada loola wadaagay iyadoo la raacaayo faqradda (2)(t) ee Qodobkaan, si waafaqsan shuruucda dhaqan-halka ee loogu talagalay dhawrista Xogta.

Qodobka 12
Xadgudubyada iyo Ciqaabaha

1. Shakhsiyaadka iyo ciddii kale ee ku xad-gudubtaa qodobada Sharciga Cunaqabateynta Maaliyadeed ee Cayiman iyo Xeer-nidaamiyahaan waxaa lagu qaadi doonaa dhammaan tallaabooyinka maamul, madani iyo/ama ciqaabeed ee ku xussan Qodobada 27 ilaa 29 ee Sharciga Ka-Hortaga Lacag-Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada.

Qodobka 13-aad
Garabyada Sedexaad ee Xayiraaddu taaban karto

1. Inta lagu guda jiro dhaqan-gelinta Sharciga Cunaqabateynta Maaliyadeed ee Cayiman iyo Xeer-nidaamiyihiisa, dhammaan shakhsiyaadka iyo cid kasta waa in ay ixtiraamaan garabyada sedexaad ee xayiraaddu taaban karto oo aan ku lug lahayn falalka argagixiso.

2. Garabyada sedexaad ee xayiraaddu taaban karto oo aan ku lug lahayn falalka argagixiso kuwaa oo aminsan in lagu xadgudbay xuquuqdooda inta la dhaqan-gelinaayay Sharciga Cunaqabateynta Maaliyadeed ee Cayiman iyo Xeer-nidaamiyahaan waxay cabasho ka furan karaa maxkamadda awoodda uleh.

Qodobka 14-aad
Xalinta Aqoonsiyada Khaldan

1. Shakhsi ama cid kasta oo aaminsan in sa khalad ah loogu cuskaday faqrad 1-aad ee Qodobka 7-aad ee Sharciga Cunaqabateynta Maaliyadeed ee Cayiman iyo faqradaha 1-aad, 3-aad iyo 4-aad ee Qodobka 7-aad ee Xeer-nidaamiyahaan, iyadoo tusaale ahaan cidda codsiga soo gudbisaneysa ay leedahay magac lamida ama u eg midka shakhsi ama cid kale ee kujira liiska shakhsiyaadka la asteeyay ee Guddiga 1267/1989, midka 1988 ama liiska maxalliga ah, waxa uu codsi usoo gudbisan kara Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada.

2. Marka uu helo codsiga lagu sheegay faqradda 1-aad ee Qodobkaan, Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada waa inuu:

b) Soo uruuriya dhamaan macluumaadka iyo dukumintiyada la heli karo oo lagama maarmaanka u ah go'aanka looga baahanyahay inay qaatan, si waafaqsan faqrada (2)(t) ee Qodobkaan.

t) Si degdeg ah uga gaaraa go'aan lagu qaatay cod aqlabiyad ah oo ah saddex meelood laba meel (2/3) oo ku aadan in codsadaha si khaldan loogu soo roggay xayiraadda iyo mamnuucidda la xiriirta iyo in kale, muddo 5 maalmood ah gudaheed ah kadib marka ay soo gaarto codsiga.

3. Kadib 24 saacadood gudahooda marka la go'aamiyo, si waafaqsan faqradda (2)(t) ee Qodobkaan, in codsadaha si khaldan loogu soo rogay tallaabooyinka xayiraadda

iyo mamnuucista, Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada waa inuu:

b) Oggolada codsiga.

t) Ogeysiiya codsadaha.

j) Ogeysiiya shakhsiga ama cid kasta ee dhaqan-gelisay tallaabada xayiraaada iyo manuucista ka dhanka ah codsadaha.

4. Kadib 24 saacadood gudahood marka lagu wargeliyo, si waafaqsan faqradda (3)(j), shakhsiga ama cidda la wargeliyay waa inuu:

b) Joojiya dhaqan-gelinta tallaabooyinka xayiraada iyo mamnuucista la xiriirta ee ka dhanka ah codsadaha.

t) La wadaaga Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada iyo Hay'adda Awoodda uleh ee Kormeerka iyo Dabagalka, xaqiijinta inuu joojiyay dhaqan-gelinta tallaabooyinka xayiraada iyo mamnuucista la xiriirta ee ka dhanka ah codsadaha.

5. Kadib 24 saacadood gudahooda marka la go'aamiyo in codsadaha si saxa loogu soo rogay tallabada xayiraada iyo mamnuucista la xiriirta, waa Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada uu:

b) Diida codsiga.

t) Ogeysiiya codsadaha.

Qodobka 15-aad
Fududeynta iyo Kormeerka Dhaqan-gelinta Sharciga

1. Hay'addaha Awooda uleh ee Kormeerka iyo Dabagalka waa in ay:

b) Diyaariyaan warbixino saddex biloodle iyo sanadle ah oo wata macluumaad faahfaahsan iyo tirakoob, oo ku aadan heerka fulinta Sharciga Cunaqabateynta Maaliyadeed ee Cayiman iyo Xeer-nidaamiyahaan.

t) Ku daraan warbixinnadaas loo diyaariyay si waafaqsan farqadda (1)(b) ee Qodobkan, tallo-bixinno gaar ah oo lagu xoojinaayo Xeer-nidaamiyahaan iyo tallaabooyinka kale ee haboon in la qaado si loo xalliyo caqabadaha kajira dhaqan-gelinta Sharciga Cunaqabateynta Maaliyadeed ee Cayiman iyo Xeer-nidaamiyahan.

j) U soo gudbiyaan warbixinada la diyaariyay iyadoo loo hoggaansamaayo faqradda (1)(b) ee Qodobkaan, Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada.

x) La wadaag nuqulo ka mid ah warbixinnada la diyaariyay iyadoo loo hoggaansamaayo faqradda (1)(b) ee Qodobkaan, labada Aqal ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya.

2. Guddiga Qaran ee ka Hortagga Lacag Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada waa inuu:

b) Helaa, kuna sameeya qiimeeyn warbixinada saddex biloodlaha iyo sanadlaha ah oo ay usoo gudbiyaan si waafaqsan faqrada (1)(j) ee Qodobkaan, Hay'addaha Awoodda uleh ee Kormeerka iyo Dabagalka.

t) Inuu sameeyo dadaalada maangalka ah ee lagu dhaqan-gelinaayo tallo-bixinnada kujira warbixinnadaas ee la soo saaray iyadoo loo hoggaansamaayo faqradda (1)(t) ee Qodobkaan.

j) Kormeera dhaqan-gelinta iyo hoggansanaanta Sharciga Cunaqabateynta Maaliyadeed ee Cayiman iyo Xeer-nidaamiyihiisa.

x) La wadaago, marka laga soo codsado, warbixinnada iyo wixii kale oo garab siin ah Xeer-ilaaliyaha Guud marka uu eedeeynaayo shakhsiyaad loo haysto maal-gelinta argagixisada.

kh) U diyaariyaan, lana wadaagan Hay'addaha Warbixinnada, haggayaasha u tilmaamaya masuuliyadda ka saaran dhaqan-gelinta Sharciga Cunaqabateynta Maaliyadeed ee Cayiman iyo Xeer-nidaamiyahan, oo ay kujiraan masuuliyada lagu qeexay Qodobadda 5-aad iyo 7-aad ee Xeer-nidaamiyahan, oo ku aadan xog-wadaagista, xayiraad saarista iyo xayiraad ka qaadista.